

**DIWAANGELINTA FOODSHARE WISCONSIN  
FOODSHARE WISCONSIN REGISTRATION**

Haddii aad qabtid curyaannimo oo aad u baahantahay inaad heshid codsigaan oo qaab kale ama u baahantahay in loo bedelo luuqad kale, fadlan la xiriir hay'adaada. Helitaanka lambarka taleefonka hay'adaada, booqo [www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm](http://www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm) ama ka soo wac Adeegyada Macaamiisha 800-362-3002. Adeegyada turjumida waa lacag la'aan.

Waxaad heli karta kale oo qaangaar ah oo kuu buuxiya codsiga adiga. Haddii faa'iidooyinkaaga FoodShare joogsadaan gudaha 30-kii maalmood ee la soo dhaafay, waxaad buuxin kartaa codsigaan ama la xiriir hay'adaada si aad u ogaatid haddii aad dib u furi kartid faa'iidooyinkaaga FoodShare adiga oo aan buuxin codsigaan.

Haddii laguugu helo inaad u qalantid FoodShare, faa'iidooyinkaaga FoodShare waxay bilaabaneysaa taariikhda codsigaaga ay helaan hay'adaada. Codsigaaga ayaa sida ugu dhaqsiyaha badan loo sameyn doonaa sida ugu dhaqsiiha badan ee suurtogalka ah laakin aan ka dambeynin 30 maalmood ee ka bilaabaneysa taariikhda codsigaaga ay helaan hay'adaada.

Magaca – Codsadaha (Dambe, Koowaad MI)

Lambarka Amniga Bulshada (iqtiyaar)	Taariikhda Dhalashada (bb/mm/ss – iqtiyaar)	Lambarka Taleefonka (iqtiyaar)
-------------------------------------	---	--------------------------------

Ciwaanka Waddada

Magaaladda	Gobolka	Furaha Zip-ka
------------	---------	---------------

<b>SAXIIXA</b> – Codsadaha ama Wakiilka Loo ansixiyay	Taariikhda La saxiixay (bb/mm/ss)
---	-----------------------------------

**Mudnaanta Adeegyada FoodShare**

Haddii aad u baahantahay caawin isla markaas waxaa suurogal ah inaad ku heshid faa'iidooyinka FoodShare todoba maalmood gudahood ee ka bilaabaneysa bixinta codsigaaga iyo/ama foomka diiwaangelinta haddii mid walba ee kuwa xiggo ay dhab yihiin:

- Qoyskaaga wuxuu haytaa \$100 ama ka yar oo kaash ahaan ama bangiga ugu jirto oo filanayo inuu helo wax ka yar dakhliga \$150 bishaan.
- Qoyskaaga wuxuu haystaa kiro, amaahda guriga /amaahda guriga ama korontada ama biyaha oo ka badan dakhliga idin soo galaysa (lacagta caddaanka ah ee aad heysataan ama bangiga idiin taala) bishan.
- Qoyskaaga waxaa ku jiro shaqaalaha muhaajirka ama beerta oo daqligiisa joogsaday.

**Ka jawaab su'aalaha soo socda ayaa loo tixgelinya adeega ugu degdegsan.**

Waa maxay dakhliga guud ee uu filanayo qoyskaaga bishaan (canshuuraha iyo ka jarida kale ka hor)?	\$ _____
Waa maxay hantida guud le heli karo ee qoyskaaga (tusaale ahaan, kaashka ama lacagta ku jirto akoonada checking ama savings ama isku aruurinta lacagta)?	\$ _____
Waa maxay tirada qoyskaaga bixiyo guud ahaan ama deynta guriga bishaan?	\$ _____
Miyuu qoyskaaga helay faa'iidooyinka Wisconsin FoodShare bishaan?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Ma dagantahay hadeer hoyga dhibanayaasha rabshada qoyska?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Miyuu qoyskaaga helaa Supplemental Nutrition Assistance Program (Barnaamijka Caawinta Nafaqada Dheeraadka) ah (SNAP, kaararka cuntada, wareejinta faa'iidooyinka korontada) faa'iidooyinka gobol kale ee bishaan?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Miyuu jiraa qof qoyskaaga ku jiro oo ah shaqaalaha muhaajirka ama beerta oo daqligiisa ay hadeer joogsatay iyo cida aan filaneyn inay hesho wax ka badan \$25 ee dakhliga ee 10 maalmood ee xigga?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya

**Haddii qoyskaaga ay tahay inuu bixiyo biilasha, ka jawaab su'aalaha soo socda.**

Haddii aad bixisid kiro, miyuu kululeynta ku jiraa kiradaada?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
---	--

Calaamey godkan (yada) ee qarashaadka gurigaaga waxaa looga baahanyahay inaad bixisid oo ku sax "Haa" ama "Maya" si aad noogu sheegtid haddii qarashaadka loo isticmaalay in lagu kululeeyo gurigaaga.

Loo isticmaalay kululeyn?		Loo isticmaalay kululeyn?	
<input type="checkbox"/> Gaaska (dabiiciga)	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	<input type="checkbox"/> Saliida shidaalka/naftada	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
<input type="checkbox"/> Korontada	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	<input type="checkbox"/> Dhuxusha	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
<input type="checkbox"/> Gaaska biyaha batroolka	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	<input type="checkbox"/> Alwaaxa	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya

Calaamey godkan (yada) ee qarashaadka qoyskaaga ee looga baahanyahay inay bixiso.

Taleefonka  Biyaha  Tolaha  Qashin ka saarida  Gelinta  Wax kale: \_\_\_\_\_

Waxaad xaq u leedahay inaad soo gudbisid codsigaaga waqti walba. Si aad u saxdid taariikhdaada xareynta (taas oo ah taariikhda faa'iidooyinkaaga ay bilaaban karto) waa inaad sheegtaa ugu yaraan magacaaga, ciwaanka, iyo saxiixa. Waxaad kadib ku buuxin kartaa codsi buuxo onleenka ee [access.wi.gov](https://www.access.wi.gov), boosto ahaan, fakis ahaan, taleefon ahaan, ama qof ahaan.

Waxaad u baahaneysaa inaad wareysi la yeelatid hay'adaada oo qof ahaan ama dhinaca taleefonka si markaas loo dhameeyo inta ka hartay codsigaaga.

Waxaa lagaa rabaa inaad bixisid cadeynta qaar ka mid ah jawaabahaaga. Fiiri "Cadeynta Loo baahanyahay" oo liiska cadeynta laga yaabo inaad ugu baahatid inaad inaga nasiisid.

#### Codsiyada boostada iyo taleefonka iyo/ama cadeynta/xaqijinta ee:

Haddii aad ku nooshahay Degmadda Milwaukee:  
MDPU  
PO Box 05676  
Milwaukee, WI 53205

Haddii **aanad** ku noolayn Degmadda Milwaukee:  
CDPU  
PO Box 5234  
Janesville, WI 53547-5234

Ama faksika: 888-409-1979

Ama faksika: 855-293-1822

Waxaad sidoo kale ku sawiri kartaa oo aad ku xareyn kartaa cadeyn walba onleenka ee [access.wi.gov](https://www.access.wi.gov).

Haddii aad rabtid inaad codsatid BadgerCare Plus ama Medicaid, waxaad ku codsan kartaa barnaamijyadaan daryeelka caafimaadka onleenka ee [access.wi.gov](https://www.access.wi.gov) isla markaas aad codsaneysid faa'iidooyinka FoodShare. Ama waxaad buuxin kartaa codsiga warqada ee daryeelka caafimaad. Codsiyada waxaa laga heli karaa onleenka [www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm](https://www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm). Ama waxaad ku heli kartaa adiga oo la xiriirayo hay'adaada.

### MACLUUMAADKA MUHIIMKA AH FOODSHARE WISCONSIN

Codsigaan waxaa loogu talagalay faa'iidooyinka FoodShare kaliya. Ma ahan codsiga BadgerCare Plus, Family Planning Only Services (Adeegga Kala Dheereynta Dhalaanka oo Kaliya), Medicaid, Wisconsin Shares Child Care Subsidy (Kaalmada Daryeelka Canuga Wisconsin Shares), ama Wisconsin Works (W-2). Waxaad ka codsan kartaa BadgerCare Plus, Family Planning Only Services, Medicaid, iyo Wisconsin Shares onleenka ee [access.wi.gov](https://www.access.wi.gov) isla markaas aad codsaneysid FoodShare. Waa inaad la xiriirtaa hay'adaada si aad u codsatid W-2.

FoodShare waa xaq u lahaansho. Looma baahno inaad codsatid W-2 ama barnaamijyo kale ee ay ugu suurtoogaleyso helitaanka faa'iidooyinka FoodShare. Faa'iidooyinka FoodShare waxaa loo heli karaa inay caawiso buuxinta baahiyada nafaqada ee qoysaska dakhliga hoose. Qoys wuxuu caadi ahaan ka sameysanyahay dad wada nool oo wadaaga cuntada. Tirada faa'iidooyinka FoodShare qoyska helaa waxay ku saleysantahay cabirka iyo dakhliga qoyska. Faa'iidooyinka FoodShare waxaa lagu sameeyaa kaarka Wisconsin QUEST, kaas oo loo isicmaalo sida kaarka bangiga ee dukaamada bargaashka oo FoodShare ogolaataa.

Waxaad xaq uleedahay xaquuqda laguugu ogeysiinayo heerkaaga diiwaangelinta 30 maalmood gudahood ee codsashada ka bilaabaneyso. Waxaad xaq u leedahay inaad ku heshid faa'iidooyinka todoba maalmood gudahood haddii aad u qalantid caawin degdeg ah.

Waxaad xaq u leedahay in si ixtiraam laguugula dhaqmo oo aan lagaa takoorin da'da, jinsiga, jinsiyada, midibka, curyaanimada, caqiidada diinta, asalka dhalashada, ama aaminaadaha diinta.

Waxaad masuul ka tahay:

- Ka jawaabida dhammaan su'aalaha ku qoran codsiga oo dhameystiran iyo daacadnimo oo aad saxiixeysid magacaaga si aad ugu cadeysid, sida waafaqsan ciqaabta been abuurka, in dhammaan jawaabahaaga ay dhab iyo sax yihiin.
- Bixinta cadeynta ee dhammaan macluumaadka loogu baahanyahay in lagu go'aansado u qalmida.
- Soo wargelinta isbedelada looga baahanyahay jadwalka waqtiga gudahiisa ee laguugu siiyay ogeysiinadaada.
- Aadan ku qoreyn lacagtaada iyo alaabahaaga qof kale magaciisa si ay u helaan faa'iidooyinka.
- Aadan diibineyn, ka ganacsaneyn, ama aadan iska bixineyn faa'iidooyinka.
- U isticmaalida faa'idooyinka FoodShare kaliya waxaad ku iibsana kartaa sheeyada la ogolaaday.

Dadka jabiyaa sharciyada FoodShare laga yaabo in laga saaro barnaamijka, la ganaaxo, la xabsiyeeyo ama sadexdoodaba.

### **Warbixinta Takoorka La'aanta**

Si waafaqsan sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo Maraykanka. Waaxda Beeraha (USDA) shuruucda xuquuqda madaniga ah iyo xeerarka, USDA, Wakaaladaheeda, xafiisyada, iyo shaqaalaha, iyo hay'adaha ka qayb galaya ama maamulaya barnaamijyada USDA waxaa laga mamnuucay ku takoorida ku salaysan isirka. midabka, asalka wadaka, galmada, caqiidada diinta, naafanimada, da'da, rumaynta siyaasadeed, ka aarsiga ama aargoosiga hawl xuquuq madani oo hore barnaamij kasta ama hawl ay qabatay ama maalgelisay USDA.

Dadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh oo macluumaadka barnaamijka ah (tusaale, Farta qoraalka indhoolaha, daabacaad wayn, cajal maqal ah, Luqadda Dhegoolaha ee Maraykanka, iwm), waa inuu la soo xidhaadhaa Wakaalada ( Gobol ama degmo) halka ay ka soo codsadeen dheefaha. Dadka dhegoolaha ah, maqalku ku adagyahay ama leh naafo hadalka ah waxay kala soo xidhiidhi karaan USDA Is gaadhsiinta Federaalka ee Dadka Nafada ah lambarkan (800) 877-8339. Intaa waxa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luqaddo kale.

Si loo gubiyo cabashada takoor la'aanta, buuxi foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA [Foomka Cabashada Takoorka Barnaamijka](#), (AD-3027) oo onlayn lagaga helo: Sida loo xareeyo Cabasho, iyo xafiis kasta oo USDA ah, ama qor warqad ku socota USDA oo warqadda ku bixi dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. si aad u codsato nuqul foomka cabashada ah, soo wac **(866) 632-9992**. U soo gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqadda USDA addoo adeegsanaya:

- (1) boosta: Maraykanka. Waaxda beeraha  
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights  
1400 Independence Avenue, SW  
Washington, D.C. 20250-9410;
- (2) fax: (202) 690-7442; or
- (3) iimaylka: [program.intake@usda.gov](mailto:program.intake@usda.gov)

Hay'dani waa adeeg bixiyaha fursadda loo simanyahay.

### **OGEYSIINTA QORAN**

Waxaad xaq u leedahay inaad ka heshid ogeysiin qoran hay'ada ka hor inta aadan qaadin wax tallaabo ah ee lagu joojinayo ama lagu yareynayo Taariikhda FoodShare. Tallaabooyinka ugu muhiimsan, waxaad warqad ka heleysaa ugu yaraan 10 maalmood ka hor tallaabada inta aan la qaadin.

### **DHAGEYSIGA CADAALAD AH**

Waxaad xaq u leedahay dhageysi cadaalad ah haddii aad ku diidantahay tallaabada hay'ad walba. Waxaad ku codsan kartaa dhageysiga cadaalada ah hadal ahaan adiga oo soo wacayo 608-266-7709 ama warqad u soo dirayo oo codsanayo dhageysiga ee:

Department of Administration  
Division of Hearing and Appeals  
PO Box 7875  
Madison, WI 53707-7875  
Fakiska: 608-264-9885

Codsigaaga waa in lagu helaa 90 maalmood gudahood ee taariikhda bilowga ee Taariikhda FoodShare **ama**, haddii aadan ku raacin tirada faa'iidooyinkaaga FoodShare, waqti walba adiga oo helayo faa'iidooyinka.

Foomka codsiga Dhageysiga Cadaalada (Request for Fair Hearing) waxaa laga dajisan karaa [www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm](http://www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm).

Xaaladaha inta ugu badan, haddii codsigaaga dhageysiga cadaalada ay helaan Division of Hearings and Appeals ka hor taariikhda bilowga tallaabada, faa'iidooyinkaaga FoodShare lama joojinayo ama lama yareynayo. Waxaad weydiisan kartaa in faa'iidooyinkaaga ay sii socdaan, ee ugu yaraan illaa go'aanka laga gaaro ee ku saabsan racfaankaaga. Inta lagu jiro waqtigaan, haddii badel kaloo aan la xiriirin uu dhaco, faa'iidooyinkaaga FoodShare way isbadeli karaan. Haddii isbadel kale uu dhaco, waxaad heleysaa warqad cusub. Haddii aadan ku qanacsaneyn go'aanka dhageysiga xaqa ah, waxa aad ka qaadan kartaa racfaan oo waxa aad codsan kartaa dhageysi xaqa oo kale. Haddii dhageysiga xaqa ah lagu gaaro go'aan ama la yareeyo faa'iidooyinka, waa in aad dib u bixisaa dheefo kasta oo aad qaadatay mudadii racfaanka aan go'aan laga gaarin. Waxa aad weydiisan kartaa inaad heli faa'iidooyinka sii socda.

Waxaad ku matali kartaa nafsadaada ama kuugu matali karaa dhageysiga ama shirka qareen, saaxib, ama qof walboo kale ee aad dooratid. Lacagta qareenkaaga ma bixineyso dawladdu. Si kastaba ha ahaatee, adeegyada sharci ee bilaashka ah waa lagu heli karaa adiga haddii aad u qalanto. Si aad wax badan uga baratid caawinta sharciga, soo wac 888-278-0633.

Haddii aad ku guuldareysatid inaad imaatid ama wakiilkaaga ku guuldareysto inuu imaado dhageysiga iyada oo aan jirin sabab wanaagsan, racfaankaaga waxaa loo tixgeliyay inuu dayacanyahay oo waa la beeninayaa.

### **MASUULKA SHARCIGA, ILLAALIYAHA, AMA WAKIILNIMADA QAREENKA**

Haddii aad leedahay masuulka sharciga, illaaliye, ama wakiilnimada qareenka, qofkaas wuxuu buuxin karaa oo ku gudbin karaa foomkaan matalaadaada. Qofkaas wuxuu sidoo kale u baahanayaa inuu gudbiyo waraaqaha ku saabsan balantiisa ama balanteeda oo ay la jiraan foomkaan.

### **WAKIILKA LA ANSIXIYAY**

Waxaad yeelan kartaa in wakiil la ansixiyay kuu buuxiyo oo ku gudbiyo foomkaan matalaadaada. Si aad ugu xilsaartid wakiil la ansixiyay, buuxi midkood foomka Appoint, Change, or Remove an Authorized Representative: Person (Magacaabid, Badelid, ama Ka saarid Wakiilka La ansixiyay: qofka), F-10126A, **ama** foomka Appoint, Change, or Remove an Authorized Representative: Organization (Magacaabida, Badelida, ama Ka saarida Wakiilka La ansixiyay: hay'ada), F-10126B. Haddii wakiil la ansixiyay bixiyo warbixin qaldan ee loo isticmaalo si loo go'aansado faa'idooyinkaaga FoodShare, midkood adiga ama wakiilkaaga la ansixiyay ayaa masuul ka noqonayo qalad walba.

### **ARUURINTA MACLUUMAADKA / ISTICMAALKA LAMBARADA AMNIGA (SOCIAL SECURITY) / MACLUUMAADKA LOO AQOONSAN KARO SHAQSI AHAAN**

**Aruurinta macluumaadkaan, oo ay ku jiraan lambarka Amniga Bulshada (Social Security) ee xubinta qoys walba, waxaa lagu ansixiyay sida waafaqsan Food and Nutrition Act of 2008 (Xeerka Cuntada iyo Nafaqada ee 2008), sida lagu badelay, 7 U.S.C. 2011-2036. Macluumaadka waxaa loo isticmaalayaa in lagu go'aansado qoyskaaga way u qalantaa ama sii wadaa inay u qalanto ka qeybqaadashada SNAP. Waxaan ku xaqiijineynaa macluumaadkaan dhinaca barnaamijyada kumbiyuutarka isleh. Macluumaadkaan waxaa sidoo kale loo isticmaalayaa in lagu kormeero u hogaansanaanta oo ay la jiraan sharciyada barnaamijka iyo maamulida barnaamijka.**

**Macluumaadka waxaa loo isticmaalayaa in lagu go'aansado haddii qoyskaaga uu heli karo ama haysan karo faa'iidooyinka.**

**Macluumaadka aad sheegtay waxaa lagu xaqiijinayaa dhinaca barnaamijyada isbarbardhiga kumbiyuutarka. Macluumaadkaan waxaa sidoo kale loo isticmaalayaa in lagu kormeero u hogaansanaanta sharciyada barnaamijka iyo maamulida barnaamijka.**

**Macluumaadkaan waxaa loo siideyn karaa hay'adaha kale ee faderaalka iyo gobolka oo baaritaan rasmi ah iyo saraakiisha fullinta sharciga ee ujeedooyinka fahadka dadka ka qaxayo inay ka fogaadaan sharciga.**

**Haddii sheegashada SNAP ka soo baxdo si ka soo horjeedo qoyskaaga, macluumaadka ku qoran codsigaan, oo ay ku jiraan dhammaan lambarada Amniga Bulshada, waxaa loo tixraaci karaa hay'adaha gobolka iyo faderaalka, sidoo kale sida hay'adaha aaurinta sheegashooyinka gaarka ah, oo sheegashooyinka tallaabada aruurinta.**

**Bixinta macluumaadka amniga, oo ay ku jiraan lambarada Amniga Bulshada ee xubinta qoys walba, waa iqtiyaar. Si kastaba, haddii aad ku guuldareysatid inaad bixisid lambarka Amniga Bulshada waxay sababeysaa diidmada faa'iidooyinka SNAP ee shaqsi walba ee ku guuldareysatay inuu bixiyo lambarka Amniga Bulshada. Lambarada Amniga Bulshada ee walba oo aad bixisay waa la isticmaalay oo lagu siideynayaa isla qaabka ee lambarada Amniga Bulshada ee xubnaha qoyska u qalma.**

**Lambarkaaga Amniga Bulshada lalama wadaagayo Muwaadaniinta Mareykanka iyo Adeegyada Socdaalka (USCIS, United States Citizenship and Immigration Services).**

#### **HEERKA SOCDAALKA**

Si ay kuugu suurtoqasho inaad heshid FoodShare, waa inaad ahaataa muwaadin Mareykan ah ama leedahay heerka socdaalka oo u qalmo ee USCIS. Heerka socdaalka ee dhammaan shaqsiyaadka codsanayo FoodShare waxaa lala xaqiijinayaa USCIS oo waxay saameyn kartaa diiwaangelinta iyo socdaalka FoodShare. Heerka socdaalka **laguma** xaqiijinayo USCIS oo shaqsi walba ee aan codsaneynin FoodShare ama tilmaamaa in isaga ama iyada aysan laheyn u qalmida heerka socdaalka ee USCIS. Si kastaba, dakhliga ka imaanayo shaqsiyaadkaas waxay saameyn kartaa diiwaangelinta iyo faa'iidooyinka FoodShare.

#### **EEGIDA MAAMULIDA TAYADA**

Dacwadaada FoodShare waxaa si wareegta ah u dooran kara Wisconsin Department of Health Services ee eegida maamulida tayada. Eegida maamulida tayada FoodShare waa eegida dacwadaada FoodShare si loo hubiyo in hay'ada kaa diiwaangelisay FoodShare ku sameysay faa'iidooyinkaaga si sax ah oo raacayo sharciyada ay dajiyeen dowlada faderaalka. Sharciga faderaalka wuxuu sheegayaa inaad la shaqeysid eegida maamulida tayada. Haddii aadan siinin macluumaadka la codsaday oo aadan la shaqeynin eegida, dacwadaada FoodShare waa la xiri karaa. Haddii midaan ay dhacdo, waxaa lagu sheegayaa inta dacwadaada laga yaabo in la xiro.

#### **SHARUUDA DIIWAANGELINTA SHAQADA OO SHAQSIYAADKA DA'DOODA AH 16 ILLAA 59**

Dhammaan codsadyaasha FoodShare iyo xubnaha da'dooda ah 16 illaa 59 waa in laga diiwaangeliyaa shaqada illaa loo tixgeliyo ka dhaafid. Waxaa lagaa diiwaangelinayaa shaqada waqtiga laguugu go'aansado inaad u qlaantid FoodShare illaa aad buuxisid ka dhaafida.

Waxaad buuxisay ka dhaafida sharuudaha diiwaangelinta shaqada haddii **mid walba** ee kuwa xiggo inay dhabtahay:

- Aad tahay 16 ama 17 sanno jir oo aadan aheyn qof koowaad ee ku jiro kooxda FoodShare.
- Aad tahay 16 ama 17 sanno jir oo aad tahay qofka koowaad ee ku jiro kooxda FoodShare laakin ka diiwaangashan dugsiga ama shaqada iyo barnaamijka tababarka ee ugu yaraan waqtiga barkiisa.
- Laguugu helay inaad ku habooneyn shaqada. Tani waxay quseysaa haddii:
  - Aad ka heshid faa'iidooyinka curyaannimada ku meelgaarka ah ama joogtada ah dowlada ama illaha gaarka ah.
  - Laguugu helo inaad maskax ahaan ama jir ahaan aadan awoodin inaad shaqeysid hay'adaada.
  - Lagu xaqiijiyay sida inaad awoodin inaad ka shaqeysid xirfadlaha daryeelka caafimaadka ama shaqaalaha bulshada.
- Aad ka diiwaangashantahay W-2 oo aad u hogaansameysid sharuudaha shaqada W-2.
- Aad tahay daryeelaha koowaad ee canuga lagu tiirsanyahay ee ka yar da'da 6 (haddii canuga ku noolyahay gurigaaga ama meel ka baxsan gurigaag). Si kastaba, haddii adiga iyo qof kale labadiinaba leedihiin xakameynta waalidnimada

ee canuga, kaliya mid idinka mid ah ayaa ka dhaafi karo sharuudaha diiwaangelinta shaqada sida daryeelaha koowaad ee canugaas.

- Aad tahaydaryeelaha koowaad ee qof kale ee aan is daryeeli karin nafsadiisa ama nafsadeeda (haddii qofka ku noolyahay gurigaaga ama meel kabaxsan gurigaaga).
- Aad codsatid ama aad heleysid magdhowga shaqada.
- Aad si joogta ah uga qeybqaadanaysid daaweynta qamriga ama ku xadubka kale ee daroogada ama barnaamijka dhaqancelinta.
- Aad shaqeyneysid 30 ama saacado ka badan isbuucii ama aad heleysid mushaarada la midka ah 30 ama saacado ka badan isbuucii ee mushaarka ugu yar ee faderaalka.
- Aad ka diiwaangashantahay ugu yaraan waqtiga barkiisa ee dugsi la aqoonsanyahay, barnaamijka tababarka, ama machadka waxbarashada sareyso.

Waxaad u baahan kartaa inaad siisid cadeyta hay'adaada haddii aad buuxisid mid ka mid ah ka dhaafidaan. Inkastoo diiwaangelinta shaqada loo baahanyahay, ka qeybqaadashada barnaamijka shaqada waa iqtiyaar.

### **XAYIRAADA SHARUUDA DIIWAANGELINTA SHAQADA**

Haddii aadan u hogaansan sharuudaha diiwaangelinta shaqada oo aadan buuxin ka dhaafida, kuuma suurto galeyso inaad heshid faa'iidooyinka FoodShare ee muddada xayiraada la qeexay. Tani waxaa ku jiro haddii aad si iqtiyaar ah oo aan la jirin sabab wanaagsan samey kuwa ka mid ah kuwa xiggo:

- Diidida siinta shaqo ku haboon
- Iska dhaafida shaqada 30 ma saacado badan isbuucii (ama shaqada leh dakhliga la midka ah 30 saacadood isbuucii ee mushaarka faderaalka ugu yar)
- Yareynta saacadahaaga shaqo oo wax ka yar 30 saacadood isbuucii (ama daqliyadaada ee wax ka yar 30 jeer ee mushaarka ugu yar faderaalka)
- Ka qeybqaadatay W-2 laakin aadan buuxin sharuudaha shaqada barnaamijka W-2
- Aad codsatay ama aad heshay faa'iidooyinka shaqo la'aanta laakin aadan buuxin sharuudaha shaqada barnaamijka shaqo la'aanta

Haddii, inta lagu jiray muddada xayiraada, aad u guurto qoys kale ee FoodShare, xasuusiayaha muddadaada xayiraada waxaa laguula wareejinayaa qoyskaas. Dhirirka muddada xayiraada waa:

- Hal bil oo xayiraada koowaad.
- Sadex bilood ee xayiraada labaad.
- Lix bilood ee xayiradaadaha sadexaad ama joogtada ah.

Waad soo afjari kartaa muddada xayiraada horaantii haddii lagaa dhaafo sharuudaha diiwaanka shaqada.

Waxaad u baahneysaa inaad dib u codsatid FoodShare haddii aad rabtid inaad heshid faa'idooyinka kadib markii ay dhammaato muddada xayiraada. Haddii aad ka qeyb tahay kooxda FoodShare, waxaad u baahneysaa inaad ogeysiiso shaqaalahaaga si aad cusbooneysiid dacwadaada badelkii aad dib u codsan laheyd.

### **SHARUUDA SHAQADA EE DADKA WEYN EE CAAFIMAADAN DA'DA 18 ILLAA 49**

Dadka qaar ee weyn ee da'dooda ah 18 illaa 49 aan laheyn carruur yar ee ku nool guriga waxaa laga yaabaa inay helaan kaliya sadex bilood ee faa'iidooyinka waqtiga ku xadidan FoodShare ee 36-bilood (sadex sanno) muddada illaa ay buuxiyaan sharuuda shaqada FoodShare ama loo tixgeliyo ka dhaafid. Sharuudaan shaqo way ka duwantahay sharuuda diiwaanka shaqada.

Waxaa jiro sadex qaabab ee lagu buuxinayo sharuuda shaqada:

1. Shaqada ugu yaraan 80 saacadood bil walba.
2. Ka qeybqaadatid barnaamijka shaqada la ogolaan karo ugu yaraan 80 saacadood bil walba, sida:
  - FoodShare Employment and Training (FSET) (Barnaamijka Shaqada iyo Tababarka ee FoodShare).
  - W-2.

- Barnaamijyada qaarkood sida waafaqsan Workforce Innovation and Opportunity Act (WIOA) (Sharciga Dhiirigelinta Shaqada iyo Fursadaha).
3. Labada shaqaba oo ka qeybqaado barnaamijka shaqada loo ogolaan karo wadarta guud ee ugu yaraan 80 saacadood bil walba.

Waxaad heleysaa warbixin ku saabsan barnaamijka FSET haddii aad ka diiwaangashantahay FoodShare.

Waxaa lagu tixgelin karaa ka dhaafida oo laga yaabo inaad u baahan inaad buuxisid sharuuda shaqada haddii kuwa ka mid ah kuwa xiggo ay dhab yihiin:

- Aad la nooshahay canu ka hooseeyo da'da 18 oo ka qeyb ah isla qoyska FoodShare.
- Aad tahay daryeelaha koowaad ee canuga ku tiirsan ee ka hooseeyo da'da 6 (haddii canuga ku noolyahay guriga ama meel ka baxsan guriga).
- Aad tahay daryeelaha koowaad ee qofka aan daryeeli karin nafsadiisa ama nafsadeeda (haddii canuga ku noolyahay guriga ama meel ka baxsan guriga).
- Aan jir ahaan ama maskax ahaan kuu suurtoogaleyn inaad shaqeysid. Tani waxaa ku jiro haddii aad la kulmeysid guri la'aan raagta.
- Aad uur tahay.
- Aad heleysid ama aad codsatay caymiska shaqo la'aanta.
- Aad ka qeybqaadaneysid daaweynta xadgudubka aalkulada ama daroogada ama barnaamijka dhaqancelinta.
- Aad ka diiwaangashantahay machadka waxbarasho sareyso ee ugu yaraan waqti barkiisa ah.
- Aad tahay da'da 18 ama ka weyn ee ka qeybgalayo dugsi sare ugu yaraan waqti barkiisa.

### **JOB CENTER (XARUNTA SHAQADA)**

Job Center waa lagu heli karaa adiga. Job Center waa isha ugu balaaran ee furitaanada shaqada ee Wisconsin. Booqo websaydka Job Center ee [jobcenterofwisconsin.com](http://jobcenterofwisconsin.com), ama waxaad isticmaali kartaa kumbiyuutarada shaashada taabashada ee ku yaalo xarunta shaqada deegaankaaga. Si aad u heshid xarunta shaqada kuu dhow, soo wac 888-258-9966 (taleefon bilaash).

### **HUBINTA KOMBIYUUTARKA**

Macluumaadka codsigaaga ku jirto waxay quseyneysaa xaqiijinta illaa dakhliga gobolka iyo u qalmida nidaamka xaqiijinta. Haddii aad shaqeysid, dakhliga shaqada iyo mushaaraha aad soo wargelisay waxaa lagu hubinayaa kumbiyuutarka mushaaradka badrooniga ku soo wargeliyay Department of Workforce Development, IRS, Social Security Administration (Maamulka Amniga Bulshada), iyo Unemployment Insurance Division (Qeybta Caymiska Shaqo la'aanta) waxaa sidoo kale lagala xiriiraa wax ku saabsan dakhliga iyo hantiyada laga yaabo inaad yeelatid. Macluumaadka ka imaaneyso hay'adahaan waxay saameyn kartaa diiwaangelintaada qoyska iyo/ama tirada faa'idada.

Haddii ay wax warbixin ah aad sheegtay lagu arko inay qaldantahay, waxaa lagu diidi karaa faa'iidooyinka FoodShare iyo/ama quseeya xukunka dambiga ee isgoo og sheegay warbixin qaldan. Waa inaad dib u bixisaa faa'iidooyin walba ee aad heshay haddii aad warbixin been ah sheegtid. Haddii sheegashada FoodShare laga sameeyo qoyskaaga, Macluumaadka codsiga ku taala, oo ay ku jiraan dhammaan lambarada Amniga Bulshada, waxaa loo tixgelin karaa hay'adaha faderaalka iyo gobolka, sidoo kale sida hay'adaha aruurinta gaarka ah, oo sheegashooyinka tallaabada aruurinta.

### **DIGNIINTA CIQAABTA FOODSHARE**

Qof kasta oo qoyska ka tirsan oo si bareer ah u jabiya mid ka mid ah sharciyada soo socda waxaa laga mamnuucayaa FoodShare muddo 12 bilood ah ka dib marka uu jabiyo sharciga, 24 bilood marka labaad ee uu jabiyo sharciga ama xad gudubka ugu horeeya e ku lugta leh maandooriyaha la xakameeyo, iyo si joogta ah xad gudubka saddexaad.

- Sheegida warbixin been ah ama qarinta warbixin si aad u heshid ama aad u sii joogteysid inaad heshid faa'iidooyinka FoodShare benefits
- Ka ganacsiga ama iibinta faa'iidooyinka FoodShare



- **Badelida kaararka si aad u heshid faa'iidooyinka aadan u qalmin inaad heshid**
- **Isticmaalida faa'iidooyinka FoodShare si aad u iibsatiid sheeyada aan cuntada aheyn sida qamriga ama tubaakada**
- **Isticmaalida faa'iidooyinka FoodShare ee qof kale, kaararka aqoonsiga, ama waraaqaha kale**

Waxay ku xirantahay qiyamka faa'iidooyinka sida xun loo isticmaalay, waxaa sidoo kale laguugu ganaaxi karaa illaa \$250,000, xabsi illaa 20 sanno, ama labadaba. Maxkamada waxay sidoo kale ka xadida kartaa FoodShare Wisconsin 18 bilood dheeraad ah. Si joogto ah ayaa lagaaga joojinayaa haddii lagu helay tahriibinta faa'iidooyinka FoodShare oo gaaraya \$500 ama ka badan. Laguuma ogolaanayo inaad ka qeybqaadato FoodShare Wisconsin muddo 10 sanno ah haddii laguugu helo inaad bayaan been abuur ah sameysay ama aad ku soo bandhigtay sida la xiriirto aqoonsiga iyo daganaanshaha lagu helayo faa'iidooyinka badan isla waqtigaas. Dambiyada cararida iyo tijaabada iyo ku xadgubbayaasha siideynta sharuuda uma suurto galeyso inuu ka qeybqaato FoodShare Wisconsin. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in dacwad dheeraad ah laguugu soo oogo sida ay dhigayso sharciyada federaalka la xidhaaha.

Haddii aad ganacsatid (iibsatiid ama iibisid) faa'iidooyinka FoodShare ee xakameynta maandooriyaha ama daroogada sharci darado ah, waxaa lagaa mamnuucayaa barnaamijka FoodShare oo muddo labo sanno ah ee ogaanshaha koowaad iyo si joogto ah ogaanshaha labaad. Haddii aad ganacsatid (iibsatiid ama iibisid) hub, rasaas, ama walxaha qarxa, si toos ah ayaa lagaaga mamnuucayaa barnaamijka FoodShare Wisconsin.

#### **CADEYNTA LOO BAAHANYAHAY**

Diiwaangelinta FoodShare lama go'aansan karo illaa aad sheegtid cadeynta jawaabaha qaarkood. Liiska hoose wuxuu muujinayaa cadeynta loo baahanyahay iyo qaar ka mid ah sheeyada aad isticmaali kartid.

- Haddii wareystahaaga uu yahay hay'adaha, fadlan la imow sheeyo badan ee cadeynta sida aad awoodid ee liiska hoose.
- Haddii wareystahaaga uu yahay taleefon ahaan, waxaa lagu soo dirayaa liiska waxa aad u baahaneysid inaad bixisid cadeyn kadib wareysigaaga taleefonka.

Haddii aysan kuu suurto galey inaad hehsid sheeyada aad u baahantahay, u sheeg hay'adaada inaad awoodin inaad heshid, iyo hay'adaada way ku caawin kartaa. Waxaa lagu weydiin karaa inaad bixisid cadeynta sheeyada aan hoos ku qorneyn. Haddii ay sidaas tahay, hay'adaada waxay kuu soo direysaa liiska cadeynta kale ee loo baahanyahay.

#### **Aqoonsiga**

- Shatiga gaari ka xeynta
- Shahaadada dhalashada
- Baasaboorka ama kaarka muwaadinka Mareykanka
- Jeega lacag bixinta
- Aqoonsiga Shaqaalaha
- Diiwaanka isbitaalka

#### **Dakhliga La helay**

- Dhammaan rasiidyada jeega ee la helay 30 maalmood ee la soo dhaafay
- Bayaan saxiixan ee ka imaanayo badrooniga oo ay ku jiraan daqliyada guud iyo taariiqaha lacag bixinta ee lagu filanayo 30 maalmood ee xigga
- Foomka Daqliyada Xaqiijinta Badrooniga

#### **Dakhliga Kale**

- (tusaale ahaan, caymiska shaqo la'aanta, caymiska curyaannimada, Amniga Bulshada (Social Security), shaqo ka fariisiga, faa'iidooyinka halyeyga, gunada milatariga)
- Warqada abaalmarinta
  - Koobiga jeega ugu dambeeyay

#### **Sheeyada xigga waxaa looga baahan karaa in lagu helo deyn.**

#### **Qarashaadka Guriga iyo Qarashaadka Korontada**

- Rasiidka kirada hadeer oo ay ku qorantahay magaca iyo lambarka taleefonka milkiilaha guriga
- Heshiiska kirada ama waraaqaha amaahda guriga
- Bayaanka canshuurta hantida hanti maguurtada
- Qarashaadka Korontada

#### **Taageerada Canuga**

- (heshay ama laguugu siiyay gobol aan aheyn Wisconsin)
- Waraaqaha amarka maxkamada ama diiwaanka kale ee lacag bixinta
  - Diiwaanka lacag bixinta ee gobolka kale



**Haddii aad tahay da'da 60 ama ka weyn, camoole ah, ama qof curyaan ah, waxaad heli kartaa deynta ee qarashaadka caafimaadka qaarkood.**

**Qarashaadka Caafimaadka / Qarashaadka**

Qarashaadka caafimaadka waxaa ku jiro, laakin kama xadidna, sida xigta:

- Isbitaalka, caafimaadka, ilkaha, iyo adeegyada araga
- Lacagta caymiska dheeraadka ee caymiska caafimaadka, lacagta caymiska Medicare, iyo qarashaadka qorshooyinka daawada qoraalka
- Daawada qoraalka iyo daawada dukaanka laga iibsado
- Guriga xanaanada iyo adeegyada caafimaadka guriga
- Qalabka iyo saadadka caafimaadka
- Qarashaadka gaadiidka iyo xareynta qarashaadka lagu helayo daryeelka caafimaadka
- La xiriirto qarashka ee adeega xayawaanka sida gaarka ah loo tababaray
- Qarashaadka Digniinta Lifeline/Medic haddii uu kuu qoro xirfadlaha daryeelka caafimaad
- Bayaanka biilka
- Raasiidaha sheeyaadka ah
- Dhlada daawada ama kaniiniga oo ugu dhagan qiimaha
- Xeerka caymiska caafimaadka ee muujinayo lacagta isugeynta caymiska, lacagta caymiska boqolkiiba, lacagta caymiska go'an ee adeegyada, ama laga jari karo
- Bayaanka ka imaanayo farmashiga
- Heshiiska dib u bixinta oo ay la jiraan bixiyaha
- Bayaanka ka imaanayo dhaqtarka ee xaqiijinayo daawada dukaanka laga iibsado waa la qoray
- Biilka adeegyada booqashada kalkaalisada, guri sameeye, ama gargaarka caafimaadka guriga
- Rasiidyada xareynta iyo/ama rasiidyada gaadiidka ee helida daaweynta iyo adeegyada caafimaadka
- Biilka ama rasiidyada ee cuntada xayawaanada, tababarka, ama adeegyada dhaqtarka xayawaanka sida gaarka ah loo tababaray.